"Talo-soo-jeedinta No. 200 waa ballanqaad cad oo Dalalka ILO xubinta ka ah iyo wakiillada loo shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqaalaha, oo iskaashi dhow la leh ururrada dadka la nool HIV iyo hay'adaha caalamiga ah ee la hawlgala, gaar ahaan UNAIDS, ku ballanqaadeen in laga faa'iideysto kaalinta weyn ee dunida shaqadu ay ka geysan karto hubinta in si guud loo helo ka-hortag, daaweyn, daryeel, iyo taageero."

**Juan Somavia, Agaasimaha Guud, ILO**

"Shaqaaluhu waa dhiigga nolosha dhaqaalaha waana in la ilaaliyaa. Jaangooyada cusub ee ILO waxaa ay hal tallaabo innagu dhoweyneysaa yoolkeennii ahaa in si guud loo helo Ka-hortag, daaweyn, daryeel iyo taageerada HIV."

"Talo soo jeedinta No. 200, waxaan uga faa'iideysan karnaa awoodda dunida shaqada waxaana aan si weyn ugaga faa'iideysan karnaa ilaalinta xuquuqaha aadanaha. Aan ka wada shaqeyno hirgelinta Taladaan. Waxaa ay wax weyn ka geysanaysaa xaqiijinta riyada ah in jiil aan lahayn AIDS la helo."

**Dr Sophie K. Kisting, Agaasimaha, Barnaamijka ILO ee HIV/AIDS iyo Dunida Shaqada**




**Dejinta siyaasado iyo barnaamijyo HIV ee goobta shaqada. Xog habboon, sax ah oo waqtigii la rabey la helo, naf ayaa ay badbaadin kartaa.**

**Ururka Shaqaalaha Adduunku (ILO)** waxaa uu goob shaqo oo kasta u arkaa in ay tahay meel uu wadahadal bulsho ka dhici karo oo laguna dhiirrigelin karo shaqo sharaf leh oo lagu helo guud ahaan dunida.

ILO waxaa ay gacan ka geysataa wanaajinta xaaladaha nololeed iyo shaqo ee malaayiin shaqaale ah iyada oo dowladaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqaalaha gacan ka siisa sameynta, ansaxinta iyo hirgelinta taas oo ay la socdaan jaangooyooyinka caalamiga ah ee shaqada ee ilaaliya xuquuqaha aadanaha ee goobta shaqada.

Dhinaca HIV iyo AIDS, ILO waxaa ay iskaashi hawleed oo dhow la leedahay hay'adaha kale ee qaybta ka ah UNAIDS si wax looga qabto HIV-ga.

**Macluumaad dheeri ah:**
Soo dejiso qoraalka Talo soo jeedinta ku saabsan HIV iyo AIDS iyo dunida 2010 (No. 200) iyo Xeerka Hab-dhaqanka ee HIV/AIDS iyo Dunida shaqada, 2001: www.ilo.org/aids.
La-soo xiriir ILO: iloaids@ilo.org

ILO AIDS www.ilo.org/aids

International Labour Organization

## Jaangooyadii Koowaad ee Caalamiga ah ee Shaqada ee ku saabsan HIV iyo AIDS

Talo soo jeedinta ILO ee HIV iyo AIDS iyo Dunida Shaqada 2010 (Lam. 200)



*Ka-hortag HIV-ga.*

*Ilaali Xuquuqaha Aadanaha ee Goobta Shaqada.*

ILO AIDS www.ilo.org/aids

## Xooji aasaaska tallaabo la qaadi karo: Jaangooyada koowaad ee caalamiga ah ee shaqada ee HIV iyo AIDS

HIV ma ahan oo keliya dhibaato caafimaad. HIV iyo AIDS waxaa ay saameyn weyn ku yeesheen shaqaalaha, qoysas-kooda, shaqada sharikaadka iyo dhaqaalaha qaran. HIV waxaa uu sababey geerida iyo maciishad waayidda malaayiin qof. Saameyntiisu waxaa ay ku badan tahay haweenka iyo ragga da'dii shaqada ku jira (15 - 49).

Sharaf-rid iyo takoor joogto ah oo sal looga dhigayo xaaladda HIV ayaa caqabad ku ah in la qaado dadaallo ka-hortag oo taabogal ah waxaana ay sababeen xadgudub loo geysto xuquuqaha goobta shaqada.




Talo soo jeedinta la xiriirta HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, 2010 (NO. 200) waxaa ansaxiyey dowladaha, ururrada loo shaqeeyeyaasha iyo kuwa shaqaalaha iyaga oo u marey qaab cajiib ah oo wax la isu oggolaanayo intuu uu socdey Shirweynihii Caalamiga ahaa ee Shaqaalaha ee bishii Juun 2010.

Dhammaan shaqaalaha waxaa ilaalinaya jaangooyada shaqada ee cusub, kuwaas oo ay ka mid yihiin

- Dhammaan shaqaalaha waaxaha kala duwan ee hawlaha dhaqaalaha, haddii uu yahay kan rasmiga ah iyo kan aan rasmiga ahayn;
- Shakhsiyaadka tababar shaqo ama shaqoku- tababara-sho ku jira, shaqo-soocodsadayaasha, shaqo-doonka iyo shaqaalaha shaqada laga saarey;
- Ciidaamada qalabka sida iyo kuwa lebistka leh. Xuquuqaha ku jira Talo soo jeedinta No. 200 kuma xaddidna shakhsiyaadka la nool HIV. Waxaa ay gaarsi-isan yihiin dhammaan shaqaalaha, qoyaskooda iyo kuwa ku tiirsan.

Xuquuqaha ku jira Talo soo jeedinta No. 200 kuma xaddidna shakhsiyaadka la nool HIV. Waxaa ay gaarsiisan yihiin dhammaan shaqaalaha, qoyaskooda iyo kuwa ku tiirsan.



## Mabaa'diida Talo soo jeedinta No. 200 Sii ambaqaaddida iyo sii xoojinta Xeerka habdhaqanka ILO ee HIV/AIDS

Waxqabadka HIV waa in loo aqoonsadaa in uu yahay mid wax ku biirinaya xaqiijinta xuquuqaha aadanaha, xorriyaadka aasaasiga ah iyo sinnaanta dheddiglaboodka ee dhammaan dadka.

Waa in aanu takoor ama sharaf-ridid shaqaalaha loogu geysan xaalad HIV dhab ah ama mid la aaminsan yahay.

Waa in mudnaan weyn la siiyaa in si kasta looga hortago isugudbinta HIV.


Goobaha shaqadu waa in ay fududeeyaan helitaanka ka hortagga, daaweynta, daryeelka iyo taageero loo helo HIV.

Shaqaaluhu waa in ay awood u yeeshaan in ay ka qaybga-laan qaabeynta, hirgelinta iyo qiimeynta barnaamijyada HIV. Dadaallada ka-hortagga waa in ay wax ka qabtaan halisaha gaarka ah ee isugudibnta shaqada dhexdeeda ka dhacda ee HIV-ga, qaaxada iyo cudurrada la xiriira.

Waa in la hubiyaa asturnaanta iyo sirnimada xaaladda HIV ee qofka.

Waa in baaritaan HIV aan dad khasab looga dhigin shaqaal-eyn daraaddeed.

Waxqabadka goobta shaqada waa in uu qayb ka ahaadaa siyaasadaha iyo barnaamijyada qaran, oo ay ka mid yihiin kuwa la xiriira shaqada iyo shaqaalaha, waxbarashada, ilaalinta bulshada iyo caafimaadka.



"Xuquuqda shaqeyntu waa mid aasaasi ah oo aadanenimo. Talo soo jeedinta ILO waxaa ay dadka la nool HIV u suuragelineysaa in ay awoodaan in xuquuqahooda ay ku xaqiij yaan dunida shaqada ayna yareeyaan takoorka.
Iskaashi dhex mara Dadka La Nool HIV iyo wasaaradaha shaqada, ururrada shaqaalaha, kuwa loo shaqeeyo iyo ganacsiyada ayaa taageeri kara hirgelinta Tala soo jeedinta iyada oo ah qaab ku saleysan xuquuqda, oo loo dhan yahay oo bulshaduna ka qayb qaadato."

**Dr Christoforos Mallouros, Shabakadda Caalamiga ah ee dadka la nool HIV/Global Network of People living with HIV (GNP+).**

## Sida loo hirgeliyo Talo soo jeedinta No. 200

**Dowladuhu waxaa ay qaadi karaan tallaabo ay ku:**

- Sameynayaan ayna ku hirgelinayaan siyaasadaha iyo barnaamijyada HIV iyo AIDS iyo dunida shaqada, iyaga oo Say iskaashanayaan ururrada loo shaqeeyeyaasha & dadka la nool HIV;
- Kaashanayaan maamullada qaran ee AIDS-ka si siyaasa-daha iyo barnaamijyada goobta shaqada loo dhexgeliyo qorshayayaasha qaran ee AIDS-ka;
- Ku dhex gelinayaan HIV mashaariicda kale ee qaran ee u habboon; Tabarayaan kormeerayaasha shaqada, garsoorayaasha iyo sameynta habab loo kormeero siyaasadaha.

**Loo-shaqeeyeyaashu waxaa ay qaadi karaan tallaabo ay ku:**

- Sameynayaan siyaasado iyo barnaamijyo ay ugu talogaleen shaqaalaha iyo qoysaskooda, kuwaas oo ay ku jiraan shaqaalaha qandaraaslayaasha ah;
- Fudueeyaan galaangal u helidda ka-hortagga, daaw-eynta, daryeellka iyo taageerada la xiriirta HIV iyaga oo hab iyagu leeyihiin u maraya ama u maraya la-hawlglayaal u habboon;
- Sameynayaan barnaamijyo HIV oo loogu talogaley silsiladda sahaydu u soo marto ayna dhisaan iskaashi maamulka iyo ganacsiga gaarka ka dhexeeya oo lagu ballaarinayo barnaamijyada HIV;
- Dhiirrigeliyaan waxbarashada iyo tababarrada HIV ee dhammaan heerarka kala duwan. Ururrada shaqaalaha waxaa ay qaadi karaan tallaabo ay ku:
- Kaashanayaan dowladaha iyo loo-shaqeeyeyaasha dhinaca kobcinta siyaasadaha iyo barnaamijyada shaqada iyo shaqaalaha ee heerarka qaran, waaxeed iyo sharikadeed;
- Kor u qaadaan wacyiga ku aaddan HIV iyo AIDS iyaga oo u maraya waxbarasho iyo tababar ay siiyaan kuwa taabacsan; Ka-qaybqaataan guddiyada goobaha shaqada ee HIV ayna door firfircoon ka qaataan hirge-linta siyaasadaha iyo barnaamijyada;
- Kala shaqeeyaan ururrada taabacsan iyo kuwa qaybaha kala duwan in ay ballaariyaan barnaamijyada oo ay gaarsiiyaan shaqaalaha dhaqaalaha dadban ee aan rasmiga ahayn.

